

## **17 sababood oo ku aadan buuga caruurta**

1. Buuga ayaa ah mid madadaalo iyo xiiso laga helo. Wuxuu keeni karaa in aynu qosolo iyo in aynu oyno. Wuxuu ina sasabi karaa, waxaanu ina tusi karaa fursado cusub.
2. Buugu wuxuu u wanaagsanyahay horumarka luuqadda iyo ereybixinta qofka.
3. Buugu wuxuu kor u qaadaa faantaasiyadda qofka, waxaana qofka ku dhaliyaa fikrado sawir oo gudihiiisa ah.
4. Buugu wuxuu keenaa su'aalo sababi kara firfircooni iyo fikrado cusub oo qofka ku dhasha.
5. Buugu wuxuu horumariyaa fikirka. Wuxuu keenaa ereybixin iyo fikrado cusub, wuxuu weyneeyaa dareenka qofka iyo aduunkaba.
6. Buuga waxaa laga helaa aqoon ku saabsan dalal kale iyo siyaabo kale oo loo noolaado, teknoolajiyadd, taariikh, iyo wixi kasta ee u dhaxeeya cirka iyo dhulka ee la doonayo in wax laga ogaado.
7. Buugu wuxuu tabobar siiyaa kartida naxariista. Wuxuu suurto geliyaa in qofku fahmo oo uu eego xaalad iyo dareen qof kale ku jiro.
8. Buugu wuxuu qofka ku kelifaa in uu ka fikiro waxa khaladka iyo saxda ah, iyo wixii wanaagsan ama xun.
9. Buugu wuxuu keeni karaa in la fahmo xaqiiqadda, waxaanu qofka ka caawin karaa in uu ogaado sida aduunyadu iskugu xidhantahay.
10. Buugu wuxuu tusi karaa in aanay markasta jawaabta hal su'aal aanay ahayn mid keli ah. Wax kastana ay suurto gal tahay in laga eego dhinacyo kala duwan.
11. Buugu wuxuu qofka ka caawin karaa in uu isagu is fahmo. Waxaanu kor u qaadaa kalsoonida qofka, isaga oo qofka tusa in ay jiraan dad kale oo sidiisa u fikiraya waxna u dareemaya.
12. Buugu qofka wuxuu ka caawiyaa in uu fahmo in dadku kala duwanyihiin. In qofku akhriyo buugaag ay qoreen qoraayo kala duwan oo wakhtiyo iyo dhaqamo kala duwan ka soo jeedaa waxay keenaan dulqaad iyo ka hortag xumaan ka fahan cid kale.
13. Buugu wuxuu qofka u noqdaa wax uu cidlada kaga raysto. Waxaa fudud in la qaato, meelkastana waa lagu akhriyi karaa. Waxaa suurto gal ah in maktabadda laga soo amaahdo.
14. Buugu wuxuu qayb ka yahay dhaxalka dhaqanka. Wuxuu keenaa dadka oo wadajir u dareema akhriska iyo sida ay wax u fahmayaan.
15. Buug caruureed wanaagsani waa ka kor loogu akhriyi karo dadka waaweyn iyo caruurta, iyadda oo ay taasi keenayso in ay farxaan. Waxa uu isku xidhe u noqonayaa qarniyadda kala duwan.
16. Buuga caruurta ayaa dad badan shaqo u ah. Qoraayadda, kuwa sawira, tafatirayaasha, madbacadda, nashqadeeyayaasha, saxayaaasha, sawirqaadayaasha, shaqaalaha maktabadda, kuwa

madbacadda leh iyo kuwa buugaagta iibiya. Wuxuu qayb ka qaataa nolol-dhaqameed qani ah, waxaana weeyaan wax la dhoofiyo oo keenaya in dalkeenu caan dalka dibadiisa ka noqdo.

17. Buuga caruurta ayaa ah qoraalka ugu horeeya ee qof akhriyo, duni aan dhamaanahayn oo inta uu qofku noolyahay oo dhan la soconaysa.